

Waaladka Qaaliga ah:

Ilmahaaga waxay ka diiwaangashanyihiin daryeelka caruurta ee guriga ee bixiyaha ka qeybqaadanayo Barnaamijka Cuntada Daryeelka Carruurta iyo Dadka weyn (Child and Adult Care Food Program, CACFP) ee Waaxda Beeraha Mareykanka (U.S. Department of Agriculture, USDA). CACFP waa barnaamijka siiyo lacag bixiyayaasha cuntooyin nafaqeysan ee la siiyo carruurta iyagoo ku jiro daryeelkooda carruurta.

**Miyaa laygaga baahan yahay dhamaystirka codsigan si markaas carruurteyda u helaan dheefaha CACFP?**

Maya, laakiin haddii Aad doorato inaad sidaas samaysid, daryeel bixiyahaaga waxaa laga yaabaa inuu helo lacag celin badan oo cuntooyinka la siiyo canugaaga. Hadii aadan dhamystirin foomka, waxaad leedahay iqtiyaarka loogu soo celiyo codsiga bixiyahaaga ama waxaad boosto ugu soo diri kartaa codsiga ciwaanka ku yaalo bashqada soo celinta ee kafaalaha. Haddii Aad doorato inaad ku soo celisid codsiga bixiyaha, hubso inaad marka koowaad ku meeleysid foomka kaasoo tilmaamo ogolaanshahaaga aad sidaan ku sameysid. Daryeel bixiyahaaga dib uma eegayo foomkaaga.

**Sidee ayuu ku helaa daryeel bixiyaheyga lacag celin badan?**

Macluumaadkan aad ku sheegtid Codsga U qalmitaanka Dakhliga Qoyska ee ku lifaaqan ayaa go'aamiyo xaalada dakhliga ee qoyskaaga iyo heerka lacag bixinta ee uu bixiyaha helayo.

**Miyay jirtaa qaab kale oo daryeel bixiyaheyga uu ku helo lacag bixin badan ee aan ka aheyn isticmaalida dakhliga qoyskaya?**

Haa. Daryeel bixiyahaaga waxaa laga yaabaa inuu u qalmo lacag bixinta badan ee ilmahaaga sida ku saleysan sida xigta:

1. Ugu yaraan hal xubin oo qoyskaaga ah ayaa helo Cuntada Aasaaska, Caawin Ku meelgaar ah oo Qoysaska Baahan (Temporary Assistance for Needy Families, TANF), ama Barnaamijka Cunto Qaybinta ee Indian Reservations (Food Distribution Program on Indian Reservations, FDPIR).
2. Ilmahaaga wuu u qalmaa cuntooyinka bilaashka ah ama la qiimo dhimay ee dugsiga.
3. Ilmahaaga wuxuu ka diiwaangashanyahay Head Start.
4. Ilmahaaga waa ilmo la koriyo.

**Haddii canugeyga hadda ka helo dheefo mid kamid ah barnaamijyadaan ama aan aaminsannahay dakhliga qoyskeyga inuu u qalmayo canugeyga lacag bixin badan, maxaan sameeyaa?**

Buuxi Codsga U qalmitaanka Dakhliga Qoyska U qalma, iyadoo la raacayo tilmaamaha foomka ku yaalo. Waxaa jiro qeyb gooni ah oo qaab walboo canugaaga u qalma. Qof walba wuxuu u baahanyahay inuu dhameystiro Qeybta 5 isagoo saxiixayo oo taariiqeynayo foomka. Qeybta 6 waa ikhtiyaari.

**Miyaa macluumaadkan la qarin doonaa?**

Haa. Macluumaadkan waxaa loo diyaarin karaa kaliya tiro xadidan oo shaqaalaha hay'adeena ama shaqaalaha Xafiiska Kormeeraha guud ee Waxbarashada Dadweynaha, Waaxda Beeraha Mareykanka, ama Xafiiska Xisaabinta Guud ee Mareykanka markii ay dib u eegayaan barnaamijyadeena.

**Ma hubo haddii dakhliga qoyskeyga u qalmo. Sidee ayaan u go'aansadaa?**

Hadii dakhligaaga uu la mid yahay qadarka sida ama ka yaryahay leenka cabirkha qoyskaaga ee jadwalka hoose ee Tilmaamaha U qalmida Dakhliga, daryeel bixiyahaaga wuxuu u qalmaa lacag bixin badan ee ilmahaaga. Dhamaystir oo ku soo celi Codsga U qalmida Dakhliga Qoyska xafiiskeena.

**Tilmaamaha U qalmitaanka Dakhliga**  
**Cuntooyinka Qiimaha Laga Dhimay**  
Laga bilaabo Luuliyo 1, 2024–Juun 30, 2025

Tirada Qoyska	Sanadle ah	Bile ah	Labo jeer Bishiiba	Labo Todobaad ee Kasta	Todobaadle ah
1	\$27,861	\$2,322	\$ 1,161	\$1,072	\$536
2	\$37,814	\$3,152	\$1,576	\$1,455	\$728
3	\$47,767	\$3,981	\$1,991	\$1,838	\$919
4	\$57,720	\$4,810	\$2,405	\$2,220	\$1,110
5	\$67,673	\$5,640	\$2,820	\$2,603	\$1,302
6	\$77,626	\$6,469	\$3,235	\$2,986	\$1,493
7	\$87,579	\$7,299	\$3,650	\$3,369	\$1,685
8	\$97,532	\$8,128	\$4,064	\$3,752	\$1,876
Xubin kasta oo kamid ah qoyska oo lagu daray, ku dar:	\$9,953	\$830	\$415	\$383	\$192

**Ilee iyo intee ayuu soconaya Codsiga U qalmitaanka Dakhliga Qoyska?**

Codsiga U qalmitaanka Dakhliga Qoyska wuxuu soconaya 12 bilood laga soo bilaabo taariiqda la saxiyo, la qiimeeyo, iyo lagu taariiqeeyo ururka ka faalo qaadayo.

**Uma qalano hada. Laakiin maxaan sameeyaa hadii xubinta qoyska noqdo shaqo la'aan?**

Haddii xubinta qoyska shaqo la'aan noqdo, dakhliga qoyska ayaa yaraado, ama tirada qoyska oo kororta, waa inaad na soo ogeysiisaa. Waxaan kugu caawin karnaa dhameystirka Codsiga U qalmida Dakhliga Qoyska e cusub.

**Yaan la soo xiriira hadii aan qabo wax su'aalo ah?**

La soo xiriir xafiiskeena ee \_\_\_\_\_.

Waad ku mahadsantahay wada shaqeyntaada.

Lifaaqa: Codsiga U qalmitaanka Dakhliga

Sida waafaqsan sharciga xaqquqaha madaniga ee dawlada dhexe iyo qaunuunada iyo xeerarka xaqquqaha rayidka Waaxda Beeraha Mareykanka (U.S. Department of Agriculture, USDA), machadkaan waa ka mamnuuc takoorida ku saleysan isirka, midabka, wadanka u dhalashada, jinsiga (oo ay ku jiraan aqoonsiga jinsiga iyo dookha galmada), naafonimada, da'da, ama ka aargudashada ama ka argoosiga howsha hore ee xuquuqaha rayidka.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu diyaarin karaa luuqado aan ka ahayn af Ingiriis. Dadka naafada ah ee u baahan qaabab kale oo isgaarsiinta lagu helayo macluumaad barnaamijka (tusaale ahaan, Qoraalka camoolaha, daabacaad weyn, cajalada maqalka, Luuqada Dhagoolaha), waa inay la xiriiraan gobolka masuulka ka ah ama hay'ada deegaanka ee bixisaa barnaamijka ama Xarunta TARGET USDA ee (202) 720-2600 (codka iyo TTY) ama kala soo xiriir USDA dhinaca Adeegaa Xiriirka Dawlada Dhexe ee (800) 877-8339.

Si aad u xareysid cabashada takoorista barnaamijka, Qofka cabashada gudbinayaa waa inuu buuxiyaa Foomka AD-3027, Foomka Cabashada Takoorista Barnaamijka USDA kaasoo laga heli karo khadka onlaynka ah: <https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/USDA-OASCR%20P-Complaint-Form-0508-0002-508-11-28-17Fax2Mail.pdf>, oo laga heli karos xafiiska kasta ee USDA, iyadoo la wacayo (866) 632-9992, ama qoraal loou dirayo warqad USDA. Warqada waa inay ku jiraan magaca qofka cabanaya, ciwaanka deegaanka, lambarka talefoonka, iyo sharaxaada qoraalka ah ee falka takoorida lagu eeddeeyay oo leh sharaxaad ku fillan oo ogeysiineyso Kaaliyaha Xoghaynta Xaqquqaha Rayidka (Assistant Secretary for Civil Rights, ASCR) wax ku saabsan Adeegyada Nafaqada Caruurta ee Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada (Office of Superintendent of Public Instruction, OSPI) (Dib loo eegay 03/24)

nooca iyo taariiqda xadgudubka xaquuqaha rayidka. Foomka AD-3027 ee dhamaystiran ama warqada waa in loo soo gudbiyaa USDA ugu dambayn:

1. **boostada:**

U.S. Department of Agriculture

2.

Office of the Assistant Secretary for Civil Rights  
1400 Independence Avenue, SW  
Washington, D.C. 20250-9410; or

3. **fakiska:**

(833) 256-1665 ama (202) 690-7442; ama

4. **iimaylka:**

[program.intake@usda.gov](mailto:program.intake@usda.gov)

Machadkan waa fursad bixiyaha loo siman yahay fursadahiisa shaqo.